**SIyaasadda Nidaamka Guud**

| **Cinwaanka:**<br>Siyaasadda Qaan-sheegta iyo Aruurinta | **Lambarka Siyaasadda:**<br>RC-04 |
|---|---|

**UJEEDADA**: Si loogu qeexo cisbitaalada iyo xarumaha caafimaadka ee HealthPartners habka loo helayo kharashka laga bixiyo bukaanada daryeelka caafimaad helay. Haddii ay dhacdo lacag-bixin la'aan, HealthPartners waxaa ka go'an inay sameeyaan dadaal macquul ah oo lagu go'aansanayo haddii bukaanka xaq u leeyahay kaalmada dhaqaale kahor inta aan la guda gelin tallaabooyinka la xiriira aruurinta. Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ee HealthPartners waxay awood u leedahay isla mar ahaantaana uu xil ka saaran yahay inay go'aan ka qaadato inay HealthPartners sameeyeen dadaal macquul ah oo lagu go'aansanayo in shaqsiga uu xaq u leeyahay kaalmada dhaqaale iyo in HealthPartners loo oggol yahay inay qaadaan tallaabooyin gaar ah oo la xiriira aruurinta kuwaasoo lagu qeexay Siyaasadan Qaan-sheegta iyo Aruurinta.

**QEEXITAANADA:** Ma khuseyso

**SIYAASADA:** HealthPartners waxaa laga yaabaa inay ku lugyeeshaan hawlaha aruurinta ee loogu talagalay helida lacagta daryeelka. Qaar ka mid ah hawlaha aruurintu waa kuwo ka muhiimsan hawlaha kale isla mar ahaantaana waxay u baahan yihiin in la helo qoraal ogeysiin ah oo loogu talogaley bukaanada, sida lagu qeexay Siyaasadan. HealthPartners lagama rabo inay bixiyaan ogeysiis qoraal ah oo loogu talogaley bukaanada marka la qabanayo hawlaha la xiriira aruurinta kharashka aan muhiimka ahayn.

HealthPartners **loogama** baahna inay ogeysiin siiyaan bukaanada kahor ka hawlgelinta hawlaha aruurinta xigta:

- U dirista bukaanka qoraalada biilka ee ay ku jiraan lacagta lagu leeyahay iyo haraaga lacag bixinta waqtigeeda la soo dhaafay;
- Isku day la xiriira wada-hadal lagu xalinayo bixinta lacagta lagu leeyahay qofka;
- U gudbinta akoontiga bukaanka qolo kale oo qaabbilsan aruurinta deynta ama hay'ada qaabbilsan arrimaha sharciga; ama
- Dirida waraaqo ama wicitaano, ay fulinayaan shirkada caymiska ee HealthPartners, wakaalada ururinta ee shirkada caymiska ee HealthPartners, ama wakiilada kale ee shirkada caymiska ee HealthPartners

Hadii cisbitaalada shirkada caymiska ee HealthPartners ay ku lug yeeshaan ficilo lacag soo ururino oo aan caadi ahayn sida ku cad sharciga federaalka, cisbitaalka waxa laga rabaa in uu ogaysiis horre sii siiyo bukaanada. Cisbitaalada HealthPartners kuma lug laha ficilada soo socda ee ururinta aan caadiga ahayn

- In hay'ada aruurinta ama shirkada sharciga laga iibiyo daynta bukaanka; iyo

- Kasoo warbixinta macluumaadka xun ee bukaanka lana siiyo wakaaladaha lacag-dhigashada macaamiisha ama xafiisyada lacag-dhigashada.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ficilada soo ururinta waxa la heli karaa iyada oo la booqanayo qaansheegta iyo ururinta IRS ee cisbitaalada ee laga heli kara mareegta. [1]Cisbitaalada HealthPartners uma dulqaataan in qareenadeeda dayn ururintu, wakiiladoodu ama shaqaalahoodu, iyo shaqaalaha cisbitaalada u qaabilsan inay bukaanka kasoo ururiyaan dayntu ay sameeyaan dhaqan cay ah, hadidaad, gardaro, been, khiyaamo, ama hadal marin-habaabin ah

**HABRAACYADA:**

**Habraacyada Qaan-sheegta:**

- HealthPartners waxay leeyihiin xeerar iyo nidaamyo diyaarsan oo lagu hubinayo in qansheegashooyinka waqti sax ah iyo si sax ah loogu gudbiyo qolooyinka kale ee lacagta bixiya. HealthPartners kuma soo dallacaan bukaanada wax ka badan waxa bukaanku masuul ka noqonayo haddii qolada kale ee bixineyso kharashka ay bixiyaan qansheegashada ama tiro walba ee loo diiday sabab la xiriirta qaladka dallacida biilka ee HealthPartners. HealthPartners uma gudbinayaan wax biil ah wakaaladaha aruurinta lacagta ee qolada kale ama qareenka aruurinta lacagta inta aysan qolada kale, ee ay HealthPartners heshiiska kula jiraan, bixin lacagta qansheegashada.
- Bukaanada aan caymiska ku jirin waxa ay heli karaan qiimo-dhimis la jaanqaadaysa sida uu dhigayo sharciga gobolku.
- Marka laga reebo bukaanada helaya gargaar caafimaad ama kuwa haysta caymis dhamaystrian, HealthPartners waxa ay u diri doonaan qoraal sheegaya baaqiga ay tahay in ay soo bixiyaan ee adeegii ay u qabteen HealthPartners. Qoraalka ay dirto HealthPartners waxa ku jri doona nambaro telefoon iyo macluumad xidhiidh si ay bukaanadu ugala soo xidhiidhaan gargaarka dhaqaale ama gargaarka kale.
- Bukaanku waxa ay su’aal ka keeni karaan ama ay ka doodi karaan qaan-sheegta ay ka helaan HealthPartners HealthPartners waxa ay kasoo jawaabi doonaan wicitaanada oo waxa ay ka jawaabi doonaan su’aalaha la xidhiidha qaan-sheegaha kuwaas oo mudo cayiman kaga imanaya bukaanka. Haddii bukaan soo ogeysiiyo HealthPartners, qareenka aruurinta deynta, ama hay’ada aruurinta deynta ee HealthPartners in bukaanku aan lagu helayn lacag, dhammaan howlaha aruurinta waa la joojinayaa ilaa waraaqda la siiyay in bukaanka uu qabo deynta ama in qolada kale ee bixiso lacagta ay bixiyeeb lacagaha oo dhan ee waajibka ku ah.

**Habraacyada Aruurinta:**

- Ilaa xadka uu sharciga gobolku ogolyahay, HealthPartners waxa ay isticmaali karaan nidaamka ururinta iskeed-isku-wada, adeega soo ururinta guryaha, telefoonka, soo ururinta waraaqaha la dirayo, adeega qareenka, isticmaalka wakiilada banaanka si ay usoo ururiyaan daynta taagan.
- Xisaabaadka u baahan dedaal soo ururineed oo wayn waxaa loo soo gudbin karaa HealthPartners ee wakiilada dibada ama qareenada.
- HealthPartners uma gudbin doonaan wax dayn caafimaad ah koox saddexaad oo ah wakiil ururin

[1] https://www.irs.gov/charities-non-profits/billing-and-collections-section-501r6#:~:text=Extraordinary%20Collection%20Actions,-ECAs%20are%20defined&text=Foreclosing%20on%20an%20individual's%20real,Causing%20an%20individual's%20arrest

ama qareen hadii uu bukaanku uu dayntii u bixiyay si waafaqsan heshiiskii qorshaha lacag bixinta ee uu la galay HealthPartners.

- HealthPartners iyo wakiiladooda dayn ururintu midkoodna bukaan bixin kari waayay dayntii dawada kama dacwayn karaan wakaalada daynta.
- HealthPartners waxa ay go'aan ka gaadhi karaan in dayn bixinta bukaanku ay tahay mid wanaagsan ama mid aan lasoo ururin karin marka: (1) bukaanku dayntii u bixiyo si dhamaystiran, hadii ay duuduub tahay ama hadii ay waafaqsantahay heshiiska qorshaha lacag bixinta. (2) bukaanku waxa uu u qalmaa kaalmo dhaqaale, HealthPartners waxa ay go'aan ka gaadhaysaa in uu bukaanku u qalmo kaalmo dhaqaale marka loo eego Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, ama uu bukaanku u qalmo qiimo-dhimis kale; ama (3) HealthPartners waxa ay go'aan ka gaadhaysaa kadib la raaco talaabooyinka Xeerkan ee la sameeyo dedaalo lacag soo ururin macquula in aanay HealthPartners lacag danbe ka dabotegin.

**<u>DADAALADA LAGU GO'AANSANAYO XAQ U LAHAANSHAHA KAALMADA DHAQAALE</u>**

**<u>Codsiyada iyo Ogeysiinada</u>**:
HealthPartners waxa ay aqbalaysaa oo ay socodsiinaysaa codsiyada kaalmada dhaqaale laga bilaabo taariikhda daryeelka la siiyay bukaanka kuna dhamaanaysa **240 cisho** kadib (1) qaansheegta ugu horaysa ee kadib marka cisbitaalka laga baxo ee cisbitaalka iyo waaxyaha adeega bukaan-socodka (2) qaansheegta koowaad waxa ku jiraya taariikhda daryeelka la helay ee adeegyada kale oo dhan. HealthPartners waxay qaadayaan tallaabooyin bukaanada lagu ogeysiinayo macluumaad ku saabsan Xeerka Caawinta Dhaqaalaha ee HealthPartners iyo in isbitaalada HealthPartners aysan qaadi doonin Tallaabooyinka Uruurinta Aan caadiga aheyn ee kor lagu sheegay ugu yaraan **muddo 120 maalmood ah** oo ka billaabaneysa taariikhda uu bukaanku helay bayaanka biilka ee la helo kadib isbitaal ka bixida. Haddii akoonka bukaanka uu ku lugleeyahay qaybo badan oo daryelka ah, HealthPartners ma qaadi doonaan tallaabooyinka aruurinta gu yaraan **120 maalmood** laga bilaabo bayaan xisaabeedka koowaad ee ka saarida isbitaalka kadib ee daryeelkii ugu dambeeyay.

Ugu yaraan **30 maalmood** kahor inta aysan HealthPartners bilaabin Tallaabooyinka Aruurinta Aan Caadiga Ahayn ee lacag-bixin la'aanta, Isbitaalka wuxuu sameynayaa waxyaabaha soo socda:

- Wuxuu bixinayaa ogaysiis qoran kaas oo ku wargalinaya bukaanka in:
  - Kaalmada dhaqaale ay diyaar u tahay shaqsiyaadka xaqa u leh;
  - In cisbitaalka uu qaadi karo Ficilo Aan-caadi ahayn oo Soo Ururin ah si loo helo lacag bixin; iyo
  - Isbitaalka waxaa laga yaabaa in uu bilowdo tallaabooyinka Aruurinta aan Caadiga ahayn 30 maalmood kadib taariikhda warqada ogeysiinta.
- Warqadda ogeysiinta ayaa ku lifaaqayaa xaashi ku qoran oo luqad caadi ah oo muujineyso guudmar ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka; iyo
- Wuxuu isku dayayaa in bukaanka lagula xiriirayo taleefon (ama fool-ka-fool haddii ay suurtogal tahay) si af ahaan loogu wargeliyo bukaanka macluumaadka ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee isbitaalka iyo sida uu bukaanku ku heli karo kaalmo la xiriirta habraaca codsiyada.



**Fiiro gaar ah:** Taariikhyada siyaasadda caymiska, ururka ay saarantahay masuuliyada koowaad, xasuusinta dib-u-eegista, iyo ansixintu waxa ay ku qoran yihiin jaldiga sarre ee ee Compliance 360 Gal jaldiga adiga oo

Marka diidmada gudbinta ama diidmada daryeelka uu ogolyahay shariciga gobolku, hadii HealthPartners go'aansadaan in dib loo dhigo ama la diido daryeel sabab la xidhiidha lacag bixin la'aanta daryeel hore loo bixiyay, HealthPartners waxa ay samayn doonaan waxyaabaha soo socda:

- In bukaanka la siiyo qoraalka ogeysiinta taas oo ay weheliso:
    - Foomka codsiga Siyaasadda Kaalmada Dhaqaalahal; iyo
    - Qiraal caddeyn ah oo ku saabsan in la heli karo kaalmada dhaqaale ee loogu talogaley shaqsiyaadka u-qalma iyo waqtiga kama-danbeysta ee HealthPartners aysan aqbali doonin codsiyada kaalmada dhaqaale ee loogu talogaley daryeelka hore ee bukaanka.
- In si degdeg ah looga hawlgalo wax alla wixii codsi ah ee la xiriira kaalmada dhaqaale ee ay helaan bukaanadu kahor inta aan la gaarin waqtiga kama-danbeysta ah

**<u>Codsiyada aan Dhameystirneyn</u>**:
Hadii inta lagu gudo jiro codsiyada HealthPartners ay HealthPartners hesho codsi ah taageero dhaqaale kaas oo aan dhammaystirneyn ama kala dhiman, HealthPartners waxa ay samaynayaan waxyaabaha soo socda:

- Joojinta wixii tallaabooyin aruurin ee haddeer socda;
- In bukaanka la siiyo ogeysiis qoraal ah kaasoo ay ku qeexan tahay xog dheeraad ah ama dukumintiyo loo baahan yahay in lasoo gudbiyo kahor inta aan codsiga la socodsiinin iyo qaabka loola xiriirayo HealthPartners; iyo
- Haddii uu bukaanka dhammaystiro codsiga kaalmada dhaqaale ee badgka ahaa inta lagu gudajira muddada codsiga ee HealthPartners, HealthPartners waxay si dhaqso ah u qaadan doonaan go'aan sida ku cad qeybta hoose ee Codsiyada Dhameystiran.

**<u>Codsiyada Dhameystiran</u>:**
Hadii HealthPartners ay helaan codsi buuxa oo kaalmo dhaqaale ah inta lagu jiro xiliga codsiga ee HealthPartners, HealthPartners waxa ay mudo cayiman ku samaynayaan kuwan soo socda:

- Joojinta wixii tallaabooyin aruurin ee haddeer socda; iyo
- Waxay go'aan ka gaari doonaan xaq ulahaanshaha caawinta dhaqaalaha waxayna aqoonsan doonaan waxa lagu saleeyey go'aanka.

Haddii HealthPartners go'aamiyaan in bukaanka xaq u leeyahay kaalmada dhaqaale, waxay sameynayaan waxyaabaha soo socda:

- Haddii bukaanka uu u qalmo daryeel la qiimo dhimay (aan ahayn daryeel bilaash ah), HealthPartners waxay bukaanka siinayaan qoraalka biilka kaasoo muujinaya qaabka loo go'aamiyey xaddiga lacagta iyo warbixinta la xiriirta xisaabaha caawinta dhaqaalaha ee HealthPartners.
- Wixii ah khidmadaha isbitaalka HealthPartners, waxay dib usoo celin doonaan wixii lacag ah ee uu bukaanku ku bixiyey daryeelka isbitaalka taasoo ka badan xaddiga lacagta ee la go'aamiyey inuu shakhsi ahaan bukaanku mas'uul ka yahay; iyo
- Qaadashada dhammaan tallaabooyinka suurtagalka ah ee la heli karo si wax looga beddelo wixii tallaabooyin uruurin ah ee laga yaabo in bukaanka lagula dhaqmay.

**<u>Go'aaminta Xaq ulahaanshaha Loo maleeyay</u>:**
Waxaa dhici karta in HealthPartners gaaraan go'aano sadaalin oo ku aadan xaq ulahaanshaha kaalmada dhaqaale. Tani waxay ka dhigan tahay in HealthPartners laga yaabo inay go'aansadaan in bukaanka xaq uleeyahay kaalmada dhaqaale iyadoo lagu saleynayo macluumaadka HealthPartners ay hore u hayeen, ama macluumaadka kale ee HealthPartners ay helaan, iyada oo aanan si toos ah bukaanka looga helin macluumaad dheeraad ah. Haddii HealthPartners ay si saadaalin ah u go'aansadeen in bukaan uu xaq u leeyahay kaalmada dhaqaale, laakiin la ogaado inuu xaq u leeyahay wax ka yar kaalmada ugu badan, HealthPartners waxay sameynayaan waxyaabaha soo socda:

- Waxay bukaanka ogeysiin doonaan go'aanka waxayna bukaanka ku wargelinayaan qaabka loo dalban karo kaalmo dhaqaalo oo dheeraad ah;
- Waxay bukaanka siinayaan waqti ku filan oo uu ku dalban karo kaalmo dheeraadka ah; iyo
- Waxay meel marinayaan codsiga dhameystiran ee kaalmada dhaqaalaha iyagoo raacayo sida lagu qeexay qaybta sare ee Siyaasadda.

HealthPartners ma samayn doonta kaalmo dhaqaale oo male-awaal ku salaysan taas oo lagu qabanayo adeegyo la doortay (gabi ahaanba ah waxyaalaha la isku qurxiyo ama wixii aan ahayn adeegyo aan muhiim ahayn oo aan caafimaad la xidhiidhin) iyo baaqiyo kale oo ay tahay in uu caymisku bixiyo (oo ay ku jiraan magdhowga shaqaalaha, gawaadhida, ama caymiska daymaha)

**<u>WAKALAADAHA URURADA SADDEXAAD EE SOO URURINTA DAYNTA:</u>**
Habka dayn ururinta ee HealthPartners waxa ka dhalan kara in koontada bukaanka loo gudbiyo urur-sadexaad oo ah wakaalad dayn ururineed. Kahor inta aan koontada bukaanka loo gudbin wakaalada dayn ururinta, HealthPartners waxa ay hubin doonaan[2] in

- Koontada bukaanka ay ku jirto adeega cisbitaalka, oo uu cisbitaalkuna yahay cisbitaalka Minnesota, oo uu cisbitaalku u hogaansamay sharciyada Xeerarka Minnesota qaybta 144.587, hadii aanu bukaanku go'aansan in uu ka qayb galo.
- Aasaasiyan ay macquul tahay oo la aamini karo in bukaanka uu qabo deyn;
- Dhamaan bixiyayaasha la yaqaano ee ururka-sadexaad waxa si sax ah qaansheegta ugu diray HealthPartners, si ay daynta hadhsani bukaanka ugu noqot masuuliyad saaran, iyo si aanay HealthPartners qaansheeg ugu soo dirin bukaanka xadi lacag ah oo shirkada caymiska ay waajin ku tahay in ay bixiso;
- Bukaanka waxa la siiyo fursad caqli gal ah oo uu kusoo codsado kaalmo dhaqaale, hadii xaqiiqooyinka iyo xaaladuhu sheegayaan in bukaanku uu xaq u leeyahay kaalmo dhaqaale; iyo
- Iyo hadii bukaanku uu sheegay in aanu awood u lahayn in deynta uu hal mar ku wada bixiyo oo uu keeno cadayn caqli gal ah oo sheegaysa in aanu awoodin in uu hal mar wada bixiyo deyntii iyada oo dhamaystiran hadii ay HealthPartners codsadaan, HealthPartners waxa ay siisay bukaanka qorshe deyn bixineed oo caqli gal ah.

Hadii uu bukaanku soo gudbiyo codsi ah kaalmo dhaqaale kadib marka HealthPartners ay u gudbiyeen koontada bukaanka wakaalad deyn ururineed, HealthPartners iyo wakaalada deyn ururinttu waxa ay la

[2] Gudaha Minnesota, shaqaale loogu talo galay nidaamka HealthPartners oo aqoon u leh xeerka baadhitaanka kaalmada dhaqaalaha ee bukaanka cisbitaalka ayaa buuxinaya afidaafitka dib u eegista khabiirka kahor inta aan koonta bukaanka oo ay kujiraan adeegyada isbitaalka loo gudbin wakaalada deyn ururinta.

socon doonaan nidaamka lagu qeexay qaybta sarre “Dedaalada Go’aanka Lagaga Gaadhayo Uqalmida Kaalmada Dhaqaale”

HealthPartners waxa ay samayn doonta kuwan soo socda si ay u kormeerto xidhiidhka ka ay la leedahay dhamaan ururada-sadexaad oo wakaaladaha soo ururinta deynta:

- Waxa ay hayn doontaa heshiis qoran oo ay la gashay wakaaladaha deyn ururinta kaas oo loo isticmaalayo in deynta looga soo ururiyo bukaanka. Heshiiska waxa uu ka doonayaa wakaaladaha deyn ururintu in ay u shaqeeyaan si waafaqsan qodobada heshiiska, sharciyada la halmaala, Siyaasadani.
- Ma siinayso wakaaladaha deyn ururinta gunno ku salaysan wax-qabad wanaagsan, gunno ku-talogal, ama lacag bixin kale oo lamid ah taas oo ku xisaabsan oo ku salaysan xadiga boqolayda deynta laga soo ururiyay laba bukaan ama ka badan. Tani kama mamnuucayso HealthPartners in ay wakaaladaha deyn ururinta qayb ka siiyaan deynta laga soo ururiyay bukaanka, iyada oo laga duulayo in HealthPartners ay leeyihiin maamul heshiis oo ku filan si ay u xaqiijiyaan in wakaaladaha deyn ururintu ay u dhaqmaan si waafaqsan sharciyada yaala iyo himilada HealthPartners
- In lagu tababaro wakaaladaha deyn ururinta Siyaasada Kaalmada Dhaqaale ee HealthPartners iyo sida ay bukaanku ku heli karaan macluumaad dheeraad ah ama ay HealthPartners ugu soo gudbin karaan codsi ah taageero dhaqaale.
- Looga baahanyahay wakaaladaha deyn ururinta iyo qareenka isticmaalaya in ay yeeshaan diiwaan lagu hayo cabashooyinka afka ah iyo kuwa qoran ee laga helo bukaanka kuwaas oo ku saabsan hab-dhaqanka wakaalada. Diiwaanku waa in uu ee la siiyay HealthPartners ugu yaraan lix (6) jeer sanadkasta. Hadii ay wakaaladu ku guuldaraysato in ay diiwan galiso oo ay bixin waydo cabashooyinka bukaanka oo dhan waxaa taasi ka dhalan kara in la joojiyo heshiiska ay HealthPartners kula jirto wakaalada.
- Hay’adaha aruurinta deynta iyo qareenkooda waxaa looga baahanyahay in ay joogteeyaan diiwaanada taariikhda, waqtiga, iyo ujeedada xiriirada oo dhan ee ku socda ama ka yimid bukaanada HealthPartners.
- Si sannadle ah loo qiimeeyo waxqabadka wakaaladaha deyn ururinta, iyada oo laga duulayo isku gaynta dhamaan adeegyada, heerka guud ee ay soo xareeyeen, falcelinta macmiilka iyo u hogaansanaanta filashooyinka ku qoran Siyaasadan.
- Miyay shakhsiyaadkii loo ogolaaday eegeen koontooyinka bukaanka kahor inta aan loo gudbin wakaalada deyn ururinta.

**DACWADA MAXKAMADA EE ARUURINTA DEYNTA**

HealthPartners ma siin doonto wakaalada deyn ururinta ama qareenka ogolaansho aan xadidnayn si talaabo sharci ay uga qaadaan bukaanka arin ku saabsan ururinta deynta caafimaadka. Wax dacwad sharci ah lagama gudbin doono bukaanka si looga ururiyo deynta caafimaadka ilaa inta uu eegayo maamule awood loo siiyay oo Adeega Dhaqaalaha Bukaanka kaas oo hubinaya in [3]:

- Hadii koontada bukaanka ay ku jirto daryeelka cisbitaalka, oo uu cisbitaalkuna yahay cisbitaalka

[3] Minnesota dhexdeeda, maamulaha loogu talo galay Adeega Gargaarka Dhaqaalaha Bukaanka ee waafaqsan nidaamka HealthPartners ee aqoonta u leh siyaasadaha cisbitaalka ee baadhitaanka dhaqaalaha bukaanka ayaa waxa uu dhamaystiri doonaa afidhaafit uu dib u eegay khabiir waxaanu hubin doonaa in loogu adeegay yeedhmooyin iyo cabashooyin hadii daynta caafimaadka ee bukaanku ay ku jirto adeega cisbitaalka.

Minnesota, oo uu cisbitaalkuna u hogaansama sharciga Minnesota qaybtiisa 144.587, hadii aanu bukaanku go'aansan in uu ka qayb qaato.

- Aasaasiyan ay macquul tahay oo la aamini karo in bukaanka uu qabo deyn;
- Dhammaan qolooyinka kale ee bixiya lacagta si sax ah loogu diray biilka, iyo in deynta hartay ay tahay mas'uuliyad dhaqaale oo saaran bukaanka, iyo in HealthPartners aysan bukaanka soo dallici doonin lacag ay tahay inay bixiso shirkadda caymiska.
- Hadii uu bukaanku sheegto in aanu cadadka lacagta daynta ah oo dhamaystiran ku wada bixin karin hal mar oo uu keeno cadaymo macquul ah oo sheegaya tabar la'aantiisa lacag bixinta daynta ah ee hal mar hadii ay codsato HealthPartners, HealthPartners waxa ay siinaysaa bukaanka qorshe lacag bixin oo macquul ah, iyo
- In bukaanka la siiyay fursad oo ku soo gudbiyo codsiga Barnaamijka Taageerada Dhaqaale hadii xaqiiqooyinka iyo xaaladuhu ay sheegaan in bukaanku uu u qalmo taageero dhaqaale.

Marka lala macaamiliyo qareenada soo ururinta daynta iyo/ama shirkadaha sharciga, HealthPartners waxa ay haysan doontaa heshiis qoran kaas oo laga rabo qareenka iyo/ama shirkada sharcigu in ay u shaqeeyaan si waafaqsan qodobada heshiiska, sharciyada lamidka ah, Siyaasadan, hadii cisbitaalada HealthPartners ay ku yaalaan Minnesota, Heshiiska Qaansheegta Cisbitaalka Qareenka Guud ee Minnesota Waxyaalahan soo socda ee la iska rabo waa in lagu dabaqaa xidhiidhka heshiiska si loo xaqiijiyo in koontooyinka bukaanku ahaadaan qaar sax ah si loo sii wado dacwado iyo in HealthPartners ay sii yeelato maamulka dacwada.

- Xafiiska La-taliyaha Guud ee HealthPartners waa in ay dusha kala socdaan ururinta daynta iyaga oo wakiil ah cisbitaalada. Xafiiska La-taliyaha Guud waa in sidoo kale la tashadaa qareenka iyo/ama shirkada shariciga hadii dacwad-burini ay haboon tahay. [4]
- HealthPartners waxa ay qareenka iyo/ama shirkada sharciga ku tababari doontaa Siyaasada Gargaarka Dhaqaale ee HealthPartners iyo sida ay bukaanku u heli karaan warbixin dheeraad ah ama ay HealthPartners ugu soo gudbin lahaayeen codsiga gargaarka dhaqaale.
- HealthPartners waxa ay si sanadle ah u baadhi doonaan u hogaansanaata heshiiska Siyaasadan.
- HealthPartners waxa ay si sannadle ah u qiimayn doonaan waxqabadka, taas oo ku salaysan heerka adeega guud, wadarta heerka soo kabashada, iyo u hogaansanaata ay rajodu la socoto ee Siyaasadan. Maamulaha Guud ee cisbitaalka HealthPartners, waxa uu eegi doontaa oo uu si sannadle ah go'aan uga gaadhi doonaa in uu sameeyo heshiis ama uu dib u cusboonaysiin ku sameeyo.
- HealthPartners ma bixinayso gunno ku salaysan wax-qabad wanaagsan, gunno ku-talogal, ama lacag bixin kale oo lamid ah taas oo ku xisaabsan oo ku salaysan xadiga boqolayda deynta laga soo ururiyay laba bukaan ama ka badan. HealthPartners waxa laga yaabaa in ay bixiso qayb kamid ah (boqolay) daynta laga soo ururiyo bukaanka, iyada oo loo eegayo in HealthPartners ay samaysay maamul heshiis oo ku filan si loo xaqiijiyo in qareenka iyo/ama shirkada sharcigu si la jaanqaadaysa

[4] Cisbitaalada Minnesota waxay buuxiyaan afidhaafid dheeraad ah oo uu khabiir eegay oo ka markhaati kacaya sida uu dhigayo Sharciga Minnesota qaybtiisa 144.587, cutubka. 1(a)(7). Kahor inta aan la codsan xukun-burin ka dhan ah bukaanka, cisbitaalka Minnesota waxa uu fulinayaa afidhaafitka si loo xaqiijiyo in (1) bukaanku aanu soo wicin ama waraaq usoo qorin cisbitaalka, wakiilkeeda deyn ururinta, ama qareenkeeda deyn ururinta si uu uga jawaabo cabashada; (2) in cisbitaalku aanu ogayn in bukaanku uu qabo xanuun, curyaanimo, cudur, ama sababo da' la xidhiidha taas oo aan u saamaxayn bukaanku in uu ka jawaabo cabashada; ama (3) in bukaanku helay adeega cabashada.

heshiisyada quseeya iyo himilada HealthPartners

- Qareenka iyo/ama shirkada sharcigu si toos ah ulama xidhiidhi karto bukaan la ogyahay in uu matalo qareen wixii ku saabsan ururinta dayntaa hadii aanu qareenka bukaanku bixin ogolaansho.
- Dhamaan qareenada iyo/ama shirkada sharci ee dayn ururintu waa in ay raacaan nidaamka uu dhigayo sharciga gobolku iyo heshiiska ay kula jiraan HealthPartners marka ay galayaan dacwada si loo soo ururiyo daynta bukaanada HealthPartners.

**RAHMID DHEX AH**

HealthPartners iyo wakiiladeeda deyn ururintu iyo qareenadeedu ma rahmi doonaan mushaharka ama koontooyinka bangiga ee bukaanka hadii aan la helin xukun maxkamadeed oo ka dhan ah bukaanka oo ku saabsan xadiga deynta.
HealthPartners ma siin doonta wakiilada deyn ururinta iyo qareenada iyo/ama shirkadaha sharciga ogolaansho aan xadidnayn si ay ugu sameeyaan rahmid koontooyinka bangiyada ama musharahka bukaanka.

Ka hor inta aan la bilaabin rahmida mushaharka bukaanka ama koontada bangiga, maamule la ogolaaday oo ah Adeega Dhaqaalaha Bukaanka ayaa ay waajib ku tahay in uu ogolaado rahmida bukaanka ay khusayso inta aan hawsha la bilaabin. [5] shaqsi awood loo siiyay waa in uu xaqiijiyo in:

- Hadii koontada bukaanka ay ku jirto adeega cisbitaalku, oo uu cisbitaalkuna yahay ka Minnesota, oo uu cisbitaalku u hogaansamay Sharciga Minnesota qaybtiisa 144.587, hadii aanu bukaanku go'aasan in uu ka qayb qaado:
- Aasaasiyan ay macquul tahay oo la aamini karo in bukaanka uu qabo deyn;
- Dhammaan qolooyinka kale ee bixiya lacagta si sax ah loogu diray biilka, iyo in deynta hartay ay tahay mas'uuliyad dhaqaale oo saaran bukaanka, iyo in HealthPartners aysan bukaanka soo dallici doonin lacag ay tahay inay bixiso shirkadda caymiska.
- Bukaanka waxa la siiyay fursad uu kusoo gudbiyo codsiga Barnaamijka Taageerada Dhaqaale hadii xaqiiqooyinka iyo xaaladuhu ay sheegaan in uu bukaanku u qalmo taageero dhaqaale.
- Hadii uu bukaanku sheegtay in aanu awoodin in uu bixiyo hal mar dhamaan xadiga lacagta daynta ah oo uu keenay cadaymo caqli gal ah oo ku saabsan awood la'aantiisa bixinta lacagta daynta ah hal mar hadii ay codsato HealthPartners, HealthPartners waxa ay siiinaysaa bukaanka qorshe lacag bixin oo caqli gal ah; iyo
- Aysan jirin wax sabab ah oo la aamini karo oo muujineyso in mushaarka bukaanka ama damaanad-qaadaha ama lacagaha yaalo wakaalad maaliyadeed ay ka raaban yihiin rahanka

Hadii bukaanku uu soo gudbiyo sheegasho qoran taas oo sheegaysa in koontada bukaanka ama mushaharka laga daayay damaanad, qareenka deyn ururinta ee HealthPartners iyo/ama shirkada sharcigu ma diidi karaan sheegashada lacag ka daynta iyaga oon marka hore ka helin Xafiiska La-taliyaha Guud ogolaansho gaar ah Marka go'aan laga gaadhayo in la siiyo ogolaansho arin gaar ah, Xafiiska La-taliyaha Guud waxa uu eegayaa dhamaan warbixinta bukaanku soo gudbiyay ee taageeraysa dalabka lacag ka

[5] Minnesota dhexdeeda, maamule loogu talo galay Adeega Dhaqaalaha Bukaanka oo ka tirsan nidaamka HealthPartners oo aqoon u leh siyaasada cisbitaalka ee baadhitaanka dhaqaalaha bukaanka ayaa buuxin doona afidhaafitka si uu khabiir u eego una xaqiijiyo in ay waafaqsantahay ficilka rahanka.

daynta ee bukaanka.

**DOKUMEENTIYADA LA XIDHIIDHA:** Ma khuseyso

**WAXYAALAHA LA TIXRAACAYO:**
**Mareegta cisbitaalka IRS ee ururinta iyo qaansheegaha**
Sida waafaqsan Qaanuunnada Minnesota, Qeybta 144.587-144.589

**WARBIXIN DHEERAAD AH:** Ma khuseyso

**KAFIILKA IYO MULKIILAHA GUDIDA/SIYAASADA:**
VP-ga Wareega Dakhliga
Hogaanka Waaxda Sharciga
Cisbitaalka Amery iyo Gudida-sarre ee Xarunta Caafimaadka
Gudida-sarre ee Cisbitaalka Hudson
Gudida-sarre ee HealthPartners/GHI
Gudida-sarre ee Caafimaadka Hutchinson
Lakeview Health/Stillwater Medical Group Board
Cisbitaalka iyo Xarunta Caafimaadka ee Olivia
Cisbitaalka Park Nicollet Methodist
Gudida-sarre ee Cisbitaalka Regions
Gudida-sarre ee Cisbitaalka Westfields